# Xaqaagga Aad ku Duubi Karto Aadna ku Indho-indheyn karto Hay'adaha Sharci-Ilaalinta

Your Rights to Record and Observe Law Enforcement


Warqadan xogta aruursan ahi waxa ay ka hadashaa xaquuqdaadda sharciga ah ee aad ku duubi karto wax-dhexmarka dadweynaha iyo hay'adaha ilaalinta IYO qaarka mid khataraha jiri kara.

Haddii adiga ama qof aad taqaan loo qabto *mudaharaadid ama ahaanta indho-indheeye sharci ah:* Ka wac Ururka Qareenadda ee Heerka Qaran (National Lawyers Guild) khadka ah 612-444-2654.

## Ciddee ayaa qayb ka ah hay'adaha Sharci-Ilaalinta?

Hay'adaha sharci -ilaalinta waxaa ku jira askarta sharci-ilaalinta ee deegaanka, sidda bilayska, shariifka, daraawiishta gobolka. Waxaa kaloo ku jira hay'adaha sharci-ilaalinta ee dowladda dhexe (federal), sidda, ICE, Hay'ada Ilaalinta Sharciga Socdaalka & Kastanka (Immigration & Customs Enforcement), Hawgaladda Fulinta iyo Saaridda (ERO), DEA Maamulka Ilaalinta Sharciyadda Maan-dooriyeyaasha (Drug Enforcement Administration), iyo FBI.

## Sharciyan ma duubi karaa hay'adaha sharci-ilaalinta marka ay meelaha maxfalka ah joogaan?



Haa. Sidda uu dhigayo Dastuurka Mareykanku (U.S.) waa aad duubi kartaa waxa aad si fudud u arki kartid adigoo goob maxfal ah jooga. Taa waxaa ku jira marka hay'adaha sharci-ilaalintu ay wax ku sameeynayaan meel maxfal ah. Tusaale ahaan, ka qabashadda qof wado ama daarad guri horteed haddii aad ka arki kartid wadadda hareeraheeda dibadda ah.

LAAKIIN sharci ma aha inaad fara-geliso (isku daydo inaad joojiso) waxa ay hay'adaha sharci-ilaalintu sameynayaan. Waxaa dhici karta inay ku waydiiyaan inaad u jirsato in masaafo ah oo macquul ah iyaga. U jirsiga 8-10 fiit caadiyan waa masaafo fiican.

Hay'adaha sharci-ilaalintu waxaa dhici karta inay kugu dhahaan jooji duubidda. Waxa aad xaq u leedahay inaad sii wado duubidda, ***laakiin waa quman tahay inaad joojiso duubidda haddii aad dareento amaan-darro***.

## Hay'adaha sharci-ilaalintu ma iiga aarsan karaan duubidda awgeed?


Hay'adaha *sharci-ilaalintu sharciyan kaagama aarsan karaan taa adiga* (ay adiga ka aar-gutaan). LAAKIIN taasi ma bixiso hubaal ah in amaankaagu uu sugan yahay. Waxaa laga yaabaa inay ku qabtaan ama ay ku xiraan. Haddii ay taa sameeyaan, waa ay adag tahay in looga guulaysto iyaga kiis maxkamadeed.

Si loogu guulaysto kiis maxkamadeed, waa inaad cadeyso in aysan ku xireen haddii aadan duubi lahayn iyaga. Waa ay adag tahay in lagu guulaysto kiis haddii hay'adaha sharci-ilaalintu ay qabaan sabab suurtagal ah oo ay ugu malayn karaan inaad dambi gaysanayso. Taasi waxay noqon kartaa dambiyo badan sidda fal shoobare ah ama diidmadda adeecida amar sharci ah.

**Xusuusnow:** Xaaladahu degdeg ayey isu isbedeli karaan. Arrinta ah inaad sharciyan xaq u leedahay inaad indho-indheyn karto xarakaadka hay'adaha sharci ilaalinta macnaheedu ma aha inaad amaan ahaanayso. Isticmaal garashadaadda iyo caqligaaga si aad u go'aansato inaad sii wadi indho-indheynta iyo in kale.


Haddii aad aaminsan tahay in hay'ad sharci-ilaalin oo dowladda dhexe leedahay ay ku xad-gudubtay xaquuqdaadda dastuuriga ah, waxa aad u soo sheegi kartaa taa xafiiska Xeer-Ilaaliyaha Guud ee Minnesota (Minnesota Attorney General) adigoo isticmaalaya foomka Soo Sheegida Falalka Dowladda Dhexe: www.ag.state.mn.us/Federal-Action. Ururka ACLU ee Minnesota (ACLU of Minnesota) siddoo kale waxa uu leeyahay foom aad isticmaali karto haddii aad is leedahay xaquuqdaadda waxaa lagu xad-gudbay: www.aclu-mn.org/ice-feds-form.

## Ka waran haddii ay hay'ad sharci-ilaalini ay i joojiso?




Haddii hay'ad sharci-ilaalini ay ku joojiso, waydii "Xor ma u ahay inaan baxo?' haddii jawaabtu ay tahay haa, si tartiib ah isaga bax. **Ha Ordin.**

Khasab kuguma aha inaad ogolaato in lagu baaro. Si cad u dheh, "Ma ogoli wax baaridyo ah." LAAKIIN xataa haddii hay'adaha sharci-ilaalintu ay si sharci-darro ah kuu baaraan, HA ISKA CAABIYIN iyaga. Gacamahaagu ha furnaandaan hana la arki karo. Ha sameyn wax dhaqdhaqaaq ah oo degdgeg ah. Haddii ay askartu u malaynayso inaad iska caabiyeyso, taasi waxa ay noqon kartaa khatar. Waxaa lagugu soo eedanyn karaa dambi ah iska caabi xiritaan.



Waxa aad xaq u leedahay inaad ka gaabsato marka hay'adaha sharci-ilaalintu ay ku waydiiyaan su'aalo. Waxa aad oran kartaa wax sidda, "ma hadlayo, waxa aan rabaa qareenkayga."

Wixii talooyin ah ee kale, ka eeg, muuqaaladda (videos) la yiraa Waxa aan Leenahay Xaquuq ee ku jira shabakadda (website): www.wehaverights.us.

## Waxaa maxay qaar ka mid ah talooyinka ku saabsan si sharci ah u indho-idheynta hay'adaha sharci-ilaalinta?

### Talooyinka Guud

Haddii aad og tahay in ay u badan tahay in aad indho-indhaynayso hay'adaha sharci-ilaalinta:

- U sheeg saaxiib ama qof ehel ah meesha aad joogto.
- Guriga uga soo tag wixii hub ah ama wixii u ekaan kara hub oo dhan.
- Ogow in aad arki karo waxyaabo dhib ah.
- Waa ra'yi wacan inaad hubiso in aan telefkankaaga adiga laguu adeegsan karin, sidda daminta aaladda sheegta meesha aad joogto iyo baayomitiriga. Wixii kale ee talooyin ah kala hadal ururadda bulshadaada ee fidiya tababaradda ku saabsan sidda loo noqdo indho-indheeye sharci.

**Ha bixin talo dhanka sharciga ah.** LAAKIIN waa aad la wadaagi kartaa cid akhbaar ku saabsan **xaquuqdooda aasaasiga ah**:

- Xaqqa aad u leedahay inaad ka gaabsato **inaad wax tiraa.**
- Xaqqa aad u leedahay **inaadan saxiixin wax dukumiintiyo ah.**
- Xaqqa aad u leedahay i**naadan albaabka furin**. LAAKIIN, haddii hay'adaha sharci-ilaalintu ay wataan warqad (warant) maxkamadeed oo uu saxiixay xaakim waa inaad u ogolaato inay gudaha guriga soo galaan. Warqaddu (warant) waa inay kor ku lahaanto erayga 'maxkamad" uuna soo saxiixay xaakimi, qaadi, ama karaani. Haddii warqaddu (warant) ay ka timi Wasaaradda Amniga Qaranka [Department of Homeland Security (DHS)], ama Laanta Socdaalka, Jinsiyadaha iyo Kastanka [Immigration and Customs Enforcement (ICE)], waa iska "Warqad Maamul" mana ay soo geli karaan gurigaaga la'aanta ogolaashahaaga.
- Xaqqa aad u leedahay **inaad codsato qareen.**

Haddii qof la xiro, iska day inaad hesho magaca qofkaa. Iska day inaad hesho akhbaar ku saabsan qofka aad  la xiriiri karto si aad ugu sheegto xirida qofka. Hadii qof ay qabato ICE, Waxa aad isticmaali kartaa Habka Sheegaha Qofka Meesha uu ku xiran yahay ee ICE: locator.ice.gov/odls. Waxaa dhici karta inay qaadato 24-48 saacadood inta habka laga cusboonaysiinayo si loo ogaado qofka meesha la geeyey.

### Talooyin ku saabsan Wax Duubidda

Haddii aad wax **duubayso:**

- Kor u deh waxa dhacaya, adigoo isticmaalaya habka **SALUTE** si aad u duubto faahfaahino muhiim ah:
    - **Baaxadda:** inta qof iyo inta gaariga ee meesha joogta:
    - **Dhaqdhaqaaqa:** Maxay hay'adaha sharci-ilaalinta iyo dadka kale sameynayaan?
    - **Goobta:** Xaggee joogtaa? Oo ay ku jiraan is-goyska iyo meelaha caanka ah?
    - **Labiska:** Waxa ay xiran yihiin hay'adaha sharci-ilaalintu?
    - **Waqtiga:** Waa maxay maalinta iyo waqtiga arrintu dhacayso?
    - **Qalabka:** Waxa uu yahay hubka, aadaha, ama qalabka kale ee aad aragto?

- Haddii hay'adaha sharci-ilaalintu ay ku dhahaan gadaal u bax, samee waxa ay ku yiraahdaan. Ku aadi kaamaradda cagahaaga kolka aad ka dhaqaaqdo meesha si aad u diiwaangeliso inaad waxa ay ku dhaheen samee.


- Ha ka qulqulin iska markaa waxa baraha bulshada hana soo gelin baraha bulshadda aan ka ahayn inaad ogolaansho ka haysato dadka ku jira muuqaalka (video). La wadaag muuqaalkaaga (video) axsaabta iyo qoyska qofka ku jira muuqaalka (video).

- Wax ha ka bedelin muuqaalka hana bedelin magaca galka.

- Daawo muuqaalka (video) la yiraa "Kolka la Diiwaangelinayo Xiritaanadda Dadka ee ICE" ee ku jira shabakadda (website) Waxa aan Leenahay Xuquuq si aad uga hesho talooyin: www.wehaverights.us.

## Talooyin Ku Saabsan Sameysiga Qoraaladda

Hadii aad **qoraal sameysanayso** ku saabsan dhaqdhaqaaqa hay'adaha sharci-ilaalinta, isticmaal habka **SALUTE** si aad u qorto faahfaahino muhiim ah sidda:



- **Baaxadda:** inta qof iyo inta gaariga ee meesha joogta? Qor lambaradda aqoonsigooda haddii aad arki karto.
- **Dhaqdhaqaaqa** Maxay hay'adaha sharci-ilaalinta iyo dadka kale ay sameynayaan?
- **Goobta:** Xaggee joogtaa? Oo ay ku jiraan is-goyska iyo meelaha caanka ah?
- **Labiska:** Maxay xiran yihiin hay'adaha sharci-ilaalintu?
- **Waqtiga:** Waa maxay maalinta iyo waqtiga arrintu dhacayso?
- **Qalabka:** Waxa uu yahay hubka, aadalaha, ama qalabka kale ee aad aragtaa?

La wadaag qoraaladaadda asxaabta iyo qoyska qofka ku jira muuqaalka (video).

*Xog Urursan oo ku saabsan macluumaadka sharciga MA AHA talo xagga sharciga. La tasho qareen.* Ha isticmaalaan xogtan urursan haddi ay 1 sano ka soo wareegtay xilligii la daabacay. Weydiiso xogtii ugu dambeysay, liiska xogta urursan, ama aad ku hesho habab kale.

**© 2026 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuqul kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsi ah waa mid si adag loo mamnuucay.**